

Bayaanka Pro-Equity Anti-Racism (Ladagaalanka Takoorka Sinaanta) ee Xafiiska Maamulka Maaliyada

Maarj 22, 2022, Gov. Jay Inslee ayaa saxeexay [Digreeto Xafiis 22-04](#), Hirgalinaya Qorsha & Buuga Gobolka Washington ee Pro-Equity Anti-Racism (Ladagaalanka Takoorka Sinaanta, PEAR). Degreetada xafiisku waxay ugu baaqaysaa dhammaan wakaaladaha laamaha gobolka, gudiyada iyo komishanadu inay kaashadaan Xafiiska Sinaanta oo dadaalkiisu yahay ladagaalanka takoorka nidaamka dawlada.

Xafiiska Maamulka Maaliyada waxa ka go'an ku taageerida degreetadan siyaasadeheena, xeerarkeena iyo hirgalinta barnaamijyadeena. Waxaanu ku biiraynaa aragtidan loo midoobey ee sinaanta iyo ladagaalanka takoorka, oo waxaanu aaminsanahay in shakhsi kasta oo ku nool Washington xaq u leeyahay inuu horumariyo bulshooyinkooda.

Inkastoo hirgalintani tahay waajib ina wada saaran, masuuliyaduhu way kala duwanaa karaan. Kooxdeena hogaanka iyo shaqaalaha kale ee doorarka hogaaminta dhammaan wakaaladeheenu waxay diirada saari doonaan qeybaha shaqada ee la xidhiidha qeybo ganacsiyo gaara. Kadib intaasi, waxa inaga go'an:

- Isticmaalka sinaanta ee dhammaan adeegyada aan siino — labadaba gudaha iyo dibada — macaamiisha iyo bulshooyinka aan ugu adeegno dhammaan gobolka. Sidaasi markaan sameyno, waxaynu meesha ka saaraynaa caqabadaha nidaamka ee ka hor istaaga dhammaan dadku inay si isku mida u helaan fursadaha iyo adeegyada. Waxaynu sidoo kale isticmaali doonaa cabir xog si aan u aqoonsano ahmiyada markaan cabirayno horumarkeena.
- Qiimeynta saameynta shakhsiyaadka iyo horumarka la xidhiidha sinaanta doorarka qaar. Waxaynu soo dhaweyn doonaa jawaab-celinta oo waxaynu kor u qaadi doonaa badqabka iyadoo wax looga qabanayo dhibaatooyinka si degdega oo ixtiraam leh. Waxaynu si firfircoon u aqoonsan doonaa qeybaha muhiimka ah. Marka aanay taasi macquul ahayn, waxaanu uga jawaabi doonaa si wanaagsan oo taxadir leh.
- Ilaalinta sinaanta ee markasta dhammaan xeerarkeena — marka laga bilaabo bayaanka hadafkeena, aragtideena iyo qiyamkeena hagi doona shaqadeena iyo xidhiidhadeena.

Dhowrka bilood ee soo socda, waxaynu qaban doonaa kulamo shaah si aan u wadaagno macluumaadka oo aan u maqalno fikirkaaga ku aadan waxay sinaantu kaaga dhigan tahay adiga iyo sida aad ugu dhex isticmaashid shaqadaada. Tani waxay inoo sahli doontaa inaan maqalno tusaaleyaal hirgalinta sinaanta ah.

Kooxdeena Gudaha ee Pro-Equity Anti-Racism (Ladagaalanka Takoorka Sinaanta) ka Dhanka ah ayaa bilaabay kulanka xagaagii u danbeeyey si ay uga kaashadaan Xafiiska Sinaanta Qorshaheena Siyaasada la xidhiidha xeerarka dhammaan ganacsiyadeena.

Waxaanu rajeynaynaa shaqadani iyo iskaashigan Xafiiska Sinaanta, kooxaheena gudaha, macaamiisha iyo daneeyayaasha. Haddii aad haysid wax fikir ama soo jeedin ah, fadlan kala xidhiidh Sargaalka Sinaanta info@ofm.wa.gov

David Schumacher iyo Emily Beck